

# Kindergarten- ka ilmaha

3-YEAR-OLD KINDER

Best Start

Best Life

## saddex jirka ah

Si ay wax fiican u fishaan,  
ilmaheenu waxay u  
baahan yihiin bilawga  
ugu fiican nolosha



**Xukuumada Fiktooriya waxay ku maalgelinaysaa ku dhowaad \$5 bilyan tobanka sano ee soo socota si loogu bilaabo Kindergartenka ilmaha jira Saddexda-Sano maalin gelin guud – waxaana hada laga heli karaa Dawlad Goboleedka oo dhan. Taas macneheedu waxa weeye waa sanad kale oo barasho, koritaan, cayaar iyo yeelashada saaxiibo dhamaan carruurta reer Fiktooriya.**

Ka qaybqaadashada barnaamij kindergarten oo tayo leh kana bilaabanaya da'da saddexaad wuxuu xoojinaya waxbarashada ilmaha, koriimada, caafimaadka iyo natiijooyinka samaqabka

**Carruurta yar yar adduunka waxay wax uga bartaan waxyaabaha ku salaysan ciyaarta**

Waxbarashada ku salaysan ciyaarta waa sida ugu fiican ee carruurta dhalinta yari waxugu bartaan. Waxay siisaa carruurta fursad lagu isticmaalo mala-awaalkooda, dhisida xirfadahooda luqadeediyo barashada wixii ku

saabsan nambarka iyo astaamaha/muuqaalada. Waxay kaloo bartaan sida loola dhaqmo dadka kale, wax loo wadaago, loo dhegaysto ayna u maareeyaan dareenkooda.

**Dhamaan carruurta reer Fiktooriya waxay heli karaan laba sanadood oo kindergarten kharajkiisa la bixiyey**

Dhamaan carruurta Dawlad goboleedka ayaa ka faaiidaysan doona 2022 iyaga oo heli kara ugu yaraan shan sacadood oo ah barnaamijka kindergarten-ka asbuuc walba. Saacaduha waxaa loo kordhin doonaa ilaa 15 saacadood asbuuc walba ugu dambayn 2029.

**Meelkasta oo ilmahaagu kindergarten-ka u aadaba, macalimiin iyo barayaal la tababaray ayaa hogaamin doona barnaamijka.**

Carruurta waxay ka tagi karaan barnaamijka kindergarten-ka adeeg maalin dhan ah (Daryeel Ilmood) ama kindergarten gooni-u-taagan.

**Ilmaha yar-yiri waxay ku baranayaan adduunka waxyaabaha ku salaysan cayaarta**

**Waxay baranayaan sida loola dhaqmo dadka kale, wax loola wadaago, dhegaysto, loona maareeyo shucuurtooda**

Barnaamijka kindergarten-ka, carruurta waxay adeegysadaan cayaar si ay u dhisaan xirfadooda luqada una bartaan wixii ku saabsan nambarka iyo astaamaha

Macalimiinta iyo hagayaashu waxay ka caawiyaan carruurta inay noqdaan kuwa raba inay wax ogaadaan, hal abuur leh kuna kalsoon wixii la xiriira waxbarashadooda.

## Barnaamijyada Kindergartenka waxaa laga yaabaa in loo bixiyo habab kala duwan.

<p><b>Kindegartenada goonida u taagan</b></p>	<p><b>Barnaamijyada Kindegartenada</b> Carruurta waxay tagaan barnaamijyada kindergarten-ka maalmo iyo saacado go'an</p>
<p><b>Adeegyada Daryeelka Maalinta oo dhan ah</b></p>	<p><b>Barnaamijyada Kindegartenada</b> Carruurta waxay tagaan barnaamijka kindergarten-ka qayb ka mid ah waqtigooda xannaanada maalinta oo dhan</p>
	<p><b>Waxbarashada iyo Daryeelka</b> Adeega Daryeelka maalinta oo dhan wuxuu siiyaa carruurta da'dooda u dhaxeeyso 0 ilaa 6 sano waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada hore</p>

Dhamaan barnaamijyada kindergarten-ka ee lamaalgeliyey waxaa waajib ku ah inay buuxiyaan tilmaamaha amaanka iyo tayada xukuumada waxaana loo sameeyay iyada oo la jaanqaadaysa Barashada Sanadaha Hore iyo Qaabka Horumarinta.

Xarunta daryeelka maalinta oo dhami wuxuu siin karaa maalin dhan oo ah waxbarasho iyo daryeel, kuwaas oo uu ku jiro barnaamijka kindergarten-ka. Barnaamijka Kindergarten-ka ee uu hogaamiyo macalinku waxaa lagu dhafay saacado siyaada ah oo waxbarasho iyo daryeel leh. Adeega iskiis u taagan, barnaamijka kindergarten-ku wuxuu soconaya keliya maalin iyo waqtiyo mucayina. Maalmahan iyo saacadahan waxaa qoondeeyey adeega kindergartenka.

**Go'aan ka gaarida meeshaad ilmahaaga u dirayso waxaa laga yaabaa inay ku xirnaan doonto adeegyada laga heli karo bulshadaada, iyo waxa u shaqaynaya qoyskaaga iyo ilmahaaga**

**Ka diiwaangelinta ilmahaaga kindergartenka Saddexda Sano ee sida guud loo maalgeliyey**

Kala hadal adeega kindergarten-kaaga wixii ku saabsan howlaha is diiwaangelintooda iyo xiliyada, booqana xaruntooda iyo shaqaaalaha. Si aad u hesho kindergartenka

deegaankaaga iyo macluumaad ku saabsan sida loo doorto adeega saxda ah ee qoyskaaga, booqo: [education.vic.gov.au/choose-kinder](http://education.vic.gov.au/choose-kinder)

Doorashada adeega kindergaarten tayo leh wuxuu xaqiijin doonaa in ilmuhu aad uga faaiideysto waqtigiisa u uku suga yahay kindergartenka. Waxaad ka eegi kartaa adeeg tayaysan adiga oo booqanaya: [www.startingblocks.gov.au](http://www.startingblocks.gov.au)

**Marka la bilaabi karo kindergartenka Saddexda Sano ah ee sida guud loo maalgeliyey**

Adeegyada badankood waxay leeyihiin hab is diiwaangelinkaas oo furma sanadka ka horeeya marka ilmuhu bilaabay barnaamijka kindergarten-ka, sidaas awgeed waa inaad ka fekertaa wixii ku saabsan is diiwaangelinta marka ilmahaaga da'da laba sanadood gaaro.

Qoysaska iyo daryeellayaasha haysta carruur dhalatay inta u dhaxeysa Janaayo iyo Abriil waxay dooran karaan sanada ay bilaabaya Kindergartenada lawada maal galiyay ee ilmaha jira Saddexda-Sano . Qoysaska waxaa laga yaabaa inay doortaan inay carruurtooda u diraan sanadka soo socda si ay ula jaanqaadaan da'da bilaabida dugsiyada, kolka carruurta kale ay jirsadaan laba sanadood markay bilaabaan.

**Carruurta dhalatay inta u dhaxeysa 1da Janaayo iyo 30ka Abriil ayaa** xaq u leh inay tagaan kindergarten-ka Da'da Saddexda-Sano marka ay jirsadeen saddex sano ama sanadka ay gaaraan afar sanadood.

Carruurta waxaa laga yaabaa in aanay awoodin inay tagaan barnaamijyada adeegoodu aanu awoodin ineey kasoo baxaan barbaariyaha iyo saamiga ilmaha da'doodu tahay laba sano jir ilaa ay ka gaarayaan saddex sano.

**Ilmaha dhashay inta u dhexaysa 1da May iyo 31ka Diseembar** waxay xaq u leeyihiin keliya inay tagaan kindergarten-ka Da'da Afarta-Sano sanaday gaarayaan shanta.

### Sanadaha kindergarten-ka lagu bilaabo

Sanada ilmuhu dhashay	Faallo	2020	2021	2022	2023	2024
21ka Dis 2016 – 30 Abriil 2017	Goysaska waxay dooran karaan inay bilaabaan dugsiga 2022 ama 2023	Kindergarten-ka 3 jirka	kindergarten-ka 4 jirka	Xanaanada	Heerka 1aad	Heerka 2aad
			Kindergarten-ka 3 jirka	kindergarten-ka 4 jirka	Xanaanada	Heerka 1aad
1da May – 20ka Dis 2017*			Kindergarten-ka 3 jirka	kindergarten-ka 4 jirka	Xanaanada	Heerka 1aad
21ka Dec 2017 - 30ka Abriil 2018	Goysaska waxay dooran karaan inay bilaabaan dugsiga sanada 2023 ama 2024		Kindergarten-ka 3 jirka	kindergarten-ka 4 jirka	Xanaanada	Heerka 1aad
				Kindergarten-ka 3 jirka	kindergarten-ka 4 jirka	Xanaanada
1da May – 20ka Dis 2018*				Kindergarten-ka 3 jirka	kindergarten-ka 4 jirka	Xanaanada

\*Taariikhda Diseembar waa teeramka ugu dambeeya dugsiga Dawlada. Haddii dugsiga ay qoysku doorteen leeyahay taariikh ka horeysa maalinta ugu dambaysa teeramka 4aad, marka waa in taariikhdaas la isticmaalaa.

### Yaa kaa caawin kara su'aalla dheeraad ah oo ku saabsan Kindergartenka seddex jirada.

- Adeega Kindergarten-ka agtaada ah ama bixiyaha, kuwaas oo uu ku jiro adeega daryeelka maalinta oo dhan
  - Golahaaga degmada ama kalkaalisada dhalmada iyo caafimaadka ilmaha
  - Wac Department of Health (DH) Waalidka oo ah 132289
  - Email [3yo.kindergarten@education.vic.gov.au](mailto:3yo.kindergarten@education.vic.gov.au)
- Booqo [www.vic.gov.au/kinder](http://www.vic.gov.au/kinder)

